Deeqda Lacagta Samofalka Hormarka Dhalinyarta Washington
Dalabka Mashruuca (Request for Proposal, RFP)

Hordhac

Waaxda Ganacsiga Gobolka Washington (Ganacsiga) waxay gacan saar la leedahay School's Out Washington (SOWA) si ay u hirgeliso nidaamka bixinta lacagaha deeqda ah ee **Deeqda Lacagta Samofalka Hormarka Dhalinyarta Washington** (Deeqda Lacagta Samofalka).

SOWA waxay bixin doontaa $9.3 milyan maalin ah oo hal mar ah oo ay siin doonaa barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta ee saamaynta ugu badan ay ku habsatay safmarka COVID-19, oo uuna shaqeeya dhalinyarta aadka uga fog cadaalada waxbarashada.

Safmarka COVID-19, xidhitaanka dugsiga ee wakhtigiisa la kordhiyay, iyo kala fogaanshaha waxa ay sii qoto dheereeyeen helitaan la'aanta iyo mushkilada caruurta iyo dhalinyarta Washington oo dhan. Barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta waxa ay si dhakhso ah ula qabsadeen adeegyadooda si ay u bixiyaan taageero dhalinyarta ah iyo qoysaskooda kuwaas oo si qoto dheer xidhiidh uga dhaxeeyo - oo ay ku jiraan daryeelka ilmaha xaalada degdeg ah, taageerada dareenka bulshada, tusaalaynta aqoonta, barnaamijyada maqal iyo muuqaalka ah, iyo taageerooyinka baahiyaha aas aasiga ah.

Deeqda Samofalka ah waxa ay ka jawaabtaa caqabadaha dhaqaale iyo barnaamij ee la socday COVID-19, waxay qirtaa waayitaanka dakhliga oo ay la socoto korodhka kharashka si loogu hogaansamo talaabooyinka amaanka COVID-19, taas oo hay'ado badan gelisa khatar xidhitaanka barnaamijyada ah ama goobaha ay ku shaqeeyaan ah.

Guudmarka RFP

Wakhtiga la bixinayo RFP gan, lagu qaybinayo deeqda abaalmarinta, way kooban tahay. Qorshayaasha waa in lagu soo gudbiyaa online ahaan arjiyada, ugu danbayn Oktoober 6, 2020. Kadib marka ay soo gudbiyaan, qorshayaasha waa in la qiimeeyaa, bixinta deeqda, iyo nidaamka dhan waa in lagu dhamaystiraa Diseember 15, 2020. (Wakhti dhamaystiran ayaa lagu bixin doonaa hoos.)

Deeqda Lacagta Samofalka waxaa kaliya lasiin doonaa hay'adaha degan, ama u shaqeeya dhalinyarta Gobolka Washington.

Si loo helo deeq dheeraad ah oo dhalinyarta mudnaanta loogala shaqeeyo iyo barnaamijyada/hay'ada saamaynta ugu badan uu ku yeeshey COVID ee gobolka oo dhan, RFP waxay bixisaa arji fudud, bilaa caqabad ah, oo online ah.

Dalbadayaashu waxay dalban karaan iyaga oo matalaya hay'adooda hormarka dhalinyarta oo dhamaystiran ama iyaga oo matalaya barnaamij hormarka dhalinyarta ah oo gaar ah ee ay ka shaqeeyaan. Kaliya hal arji ayaa la aqbali doonaa hay'ad kasta. Kaliya waxaa laga soo reebi doonaa hay'ada hormarka dhalinyarta kuwaas oo sidoo kale ku shaqeeya wakiilka xisaabaadka ee hay'ad/barnaamij kale. Mararkaas oo kale, mid kastaa waxa uu soo gudbin karaa arji.

Barnaamijyada/hay'adaha hela lacagta kale ee samofalka ah ee COVID-19 ee ka yimaado ilo dawladeed ama gaar ah waxa ay u qalmaan inay dalbadaan Deeqda Lacagta Samofalka.

Waxyaabaha arjiga loogu baahan yahay waxaa kamid ah sharax kooban oo ku saabsan barnaamijka/hay'ada; deegaanka dhalinyarta ku jirta; cadaynta u qalanka hay'ada/barnaamijka; qoraal kooban iyo masuuliyadaha sadexda aaga ee mudnaanta u ah; iyo guudmarka macluumaadka miisaaniyada. Foomamka miisaaniyada looma baahna.

Dadka ka jawaabaya waxaa laga dalban doonaa inay saxaan sanduuqyada arjiga si ay u xaqiijiyaan u qalankooda kuwaas oo ku salaysan shuruudahan;

- □ 501 (c)(3) Hay'ada samo fal ama xisaabta maalgeliayha ee 501 (c)(3)
- □ Barnaamijyada/hay'adaha adeegyada siiya hormarka dhalinyarta ee caruurta iyo dhalinyarta u dhaxayso da'doodu 5-24 wixii ka horeeyay COVID-19
- □ Adeegyada dhawaan ama qorshaysan ee dhalinyarta ee foolka-foolka, maqal iyo muuqaal ama taageerada baahida ee tooska ah ah intii u dhaxaysa Maarso iyo Diseember 2020
- □ Saamaynta dhaqaale xumada ee barnaamijka/hay'ada, taas oo ay keentey COVID-19

Cida buuxisa shuruudaha waxaa laga dalban doonaa inay si kooban u qoraal oo ay jajabiyaan sadexda aag ee mudnaanta u ah ka jawaabida kuwa soo socda, iyo sidoo kale soo kobitaanka 2019 iyo (saadaasha) 2020 ee dhaqaale iyo kharashka macluumaadkooda:

1. Dhalinyarta loogu shaqeeyo bulshada mudnaanta lagu siiyo hormarinta cadaalada waxbarashada
2. Shaqaalaha barnaamijyada/hay'adaha iyo hogaankooga
3. Saamaynta safmarka COVID-19

Kaalmada Farsamo

RFP waxaa lagu turjubay Amharic, Arabic, Chinese Mandarin, Korean, Marshallese, Russian, Samoan, Somali, Spanish, Tagalog, Tongan, Ukrainian iyo Vietnamese. Macluumaadka sida loo heleyo RFP-ga turjuban waxaa laga heleyaa halkan. Arjiga online-ka ah waa in lagu gudbiyaa Ingiriisi ahaan.

Ganacsigu waxa uu qandaraas ku siiyay bixiyayaal kaalmo farsamo oo kala duwan oo bixiya kaalmada buuxinta arjiga deeqda lacagta, oo ay ku jiraan fahanka shuruudaha RFP iyo bixinta taageerada qorista qorshaha deeqda. Kaalmada farsamo waxaa lagu heli doonaa Ingiriisi iyo dhawr luuqadood oo kale, waxaana lasiin doonaa hay'adaha gobolka oo dhan. Dalbadayaashu waa inay si toos ah ula xidhiidhaan bixiyayaasha kaalmada farsamo si ay taageero uga dalbadaan. Liiska dhamaystiran, oo ay ku jiraan macluumaadka xidhiidhka iyo luuqada taageerada waxa ay ku jiraan boga Deeqda Lacagta Samofalka SOWA.

Macluumaadka madalaha lagaga jawaabayo su'aalaha ku saabsan RFP waxaa lagu qaban doonaa kulamadooda Zoom Sebteember 24, 2020 markay tahay 4:00 iyo Sebteember 29, 2020 markay tahay

6:30. Fadlan eegboga Deeqda Lacagta Samofalka SOWA wixii macluumaad dheeraad ah iyo is duwaan gelinta.

Su'aalaha badanaa la iska waydiiyo RFP waxaa laga heli karaaboga Deeqda Lacagta Samofalka SOWA. Dhamaan su'aalaha cusub ee kulanka la isku waydiiyay ama lagu soo diray iimeelka youthdevrelief@schoolsoutwashington.org websaytka ayaa lasoo dhigi doonaa. Su'aalaha badanaa la is waydiiyo waxaa la cusboonaysiin doonaa ugu yaraan sadex jeer laba todobaad ee RFP ay furan tahay. Macluumaad dheeraad ah ayaa lagu soo daray Wakhtiga RFP, ee hoose.

Nidaamka Qiimaynta Mashruuca

SOWA waxay wadaa qiimayn balaadhan, oo wacyi gelin gobolka oo dhan oo lagu eegayo celcelis ahaan 150 mashruuc, taas oo diirada lagu saarayo inay ka qaadato kuwa deegaanka ee ugu xoogan iyo BIPOC (Black, Indigenous, People of Color (Madawga, Dadka Dhaladka ah, Dadka Midabka ah)) wixii matalaya. Koox yar oo qiimeeyayaal ah ayaa ka wada shaqayn doona, dadka gacansaarka lala leeyahay ee muhiimka ah kuwaas oo markaa noqonaya qiimayayaal wayn. Kooxda qiimaynta samaynaysa ayaa qiimayn doonta qorshayaalsha deegaankooda. Dadka gacansaarka lala leeyahay ee gobolka oo dhan ayaa wakhti siin doonaa oo qiimayn doona oo waxaana loo qaybin doonaa kooxaha dhamaan deegaanada oo dhan.

Dhamaan qiimeeyayaasha waxaa laga dalban doonaa inay marka hore sheegaan wixii dan gaar ah ee ay leeyihiin ee arrintan ay iska hor iman karaan. Marka lagu qorayo kooxda qiimaynta waxaa la xaqiijin doonaa in qiimeeye aanu qiimaynin mashruuca barnaamijyo/hay'ad uu ka shaqeeyo, xubin gudi ah ka yahay, ama uu la taliye ka yahay. Qiimayayaasha waxa ay geli doonaa tobobar bilaa eex ah, kahor inta aan la bilaabo qiimaynta mashaariicda. Dhamaan qiimeeyayaasha gobolka oo dhan waxa ay isticmaali doonaa nidaam dhibco siin oo isku mid ah.

School's Out Washington ayaa hagi doona qiimaynta nidaamka, waxaana kamid ah kaalmaynta qiimeeyaha hogaanka, sida loogu baahdo, marka la fududaynayo qiimaynta. Marka kooxda qiimayntu ay dhamaystiraan qiimaynta iyo nidaamka siinta dhibcaha, SOWA ayaa eegi doonta dhibcaha dhamaan kooxaha.

Qaybinta Deegaanka ee Kooxda Qiimaynta iyo Bixinta Deeqda

Khariirada hoose waxa ay sheegeysaa lix deegaan oo gobolka ah, oo markaa waafaqsan Washington's Department of Children, Youth and Families' (DCYF's) lixda deegaan ee lagu bixiyo. SOWA waxay isticmaali doontaa DCYF deegaanka ah taas oo u qaybsan deegaan ahaan gobol marka lagu qorayo kooxda qiimaynta qorshaha ee la ogaanayo bixinta deeqda.

Yoolashada qaybinta lacagta ee gobolka oo dhan waxaa lagu bixin doonaa laba macluumaad oo muhiim ah oo u gaar ah deegaanadan: dhalinyarta 18 iyo dhalinyarta saboolnimada ku nool; iyo dhalinyarta BIPOC, 18 iyo ka yar. Maabka hoose, sida lagu qaybinayo boqolkiiba waxay ku salaysan tahay boqolkiiba Dhalinyarta 18 ama ka yar ee saboolka ah ee Washington iyo boqolkiiba dhaliyarta 18 jirka ama ka yar ee BIPOC ee Washington ee degan deegaan kasta. Macluumaadka waxaa la saaray miisaan isku mid ah si loo ogaado yoolashada qaybinta lacagta ee deegaanka In kasta oo ay yihiin kuwani yoolal qaybinta deegaanka, buuxintoodu waxay ku xidhnaan doonaa tirada inta u qalanta iyo qiimaynta heerka sare ee mashaariicda laga heley deegaan kasta.



Shuruudaha Qiimaynta Mashruuca

Sadex aaga ee mudnaanta ee arjiga (sida kor lagu sheegey Guudmarka Mashruuca) waxa uu bixin doonaa qaab dhismeedka qiimaynta mashruuca.

Iyada oo la isticmaalayo qaab dhibco siin isku mid ah, qiimayayaashu waxay qiimayn doonaan sida, iyo ilaa inta, barnaamijyada/hay'aduhu ay:

1. Ka shaqeeyaan mudnaanta shacabka dhalinyarta ah, balaadhinta cadaalada waxbarashada	50% isugayn dhibcaha
2. Inay ka muuqato mudnaanahaasi dadka ay u adeegayaan shaqaalaha iyo hogaanka barnaamijyada/hay'adaha	20% isugayn dhibcaha
3. Inay la kulantay saamayn dhaqaale iyo barnaamij oo uu keeney COVID-19	30% isugayn dhibcaha

Marka qiimaynta ay dhamaystiraan qiimayayaasha mashaariicdu oo ay gudbiyaan dhibcahooda ugu danbaysay, SOWA ayaa qiimayn doonta dhibcaha kooxaha.

Marka laga tago talooyinka kooxda qiimaynta, SOWA waxay sidoo kale eegi doontaa wakaalada siman ee shacabka mudnaanta ah ee gobolka oo dhan, iyo in deegaanka si siman loogu qaybiyo, marka lagu talinayo ogaanshaha ugu danbeeya iyo cabirka deeqda ee Ganacsiga.

Bixinta Deeqda Lacagta

Deeqda lacagta waxaa lasiin doonaa barnaamijyada/hay'adaha dhamaan aagaga gobolka, waxaana xooga lagu saari doonaa kuwa u shaqeeya shacabka dhalinyarta ah ee sida uu u saameeyay COVID-19 ee aadka uga fog cadaalada waxbarashada.

Cabirka deeqdu waxay u dhaxaysaa $10,000 ilaa $50,000. Ma jiri doonta deeq ka yar $10,000 oo mana jiri doonto deeq ka badan $50,000.

Go'aaminta cabirka deeqda ee cid kasta oo la siinayo waxay ku salaysnaan doontaa boqolkiiba inta uu yahay kharashka 2019 ee cida lasiinayaayi. Boqolkiiba xajmiga deeqda waxaa lagu ogaan doonaa qiimaynta qorshaha, kaas oo ku salaysan macluumaadka dhaqaale oo ay ku jiraan qorshayaasha, iyo tirada mashruuc ee la heley. Tiro yar oo barnaamijyo/hay'ado ah ayaa lasiin doonaa xad badan boqolkiiba wadarta kharashkooda 2019 marka la eego tirada badan ee barnaamijyada/hay'adaha.

Barnaamijyada/hay'adaha hela deeqda soo maraysa Deeqda Lacagta Samofalka waxaa loo arkaa inay yihiinqaadataaya deeqda. Marka ay sidaa u helaan deeqda lacagta, dadka qaaday waxaa laga dalban doonaa inay buuxiyaan foomam si ay u fududaato u shubitaanka lacagta, xaqiijinta helitaanka, iyo macluumaadka hay'ada oo dhamaystiran oo ku jira Elevate Washington.

Bixinta lacagta deeqdu waxaa weeye lacagta aan xadidnayn. Ma jiri doonto wax shuruudo warbixinta ahi. Cida qaadatay lacagta lagama dalban doono inay soo gudbiso wax waraaqo ah oo sida ama goobta ay kharash garaynayaan ah lacagta.

Wakhtiga

Sebteember 22, 2020	Bixinta RFP
Sebteember 23, 2020	Usoo gudbi su'aasha badanaa la is waydiiyo ugu danbayn duhurnimada, si jawaabta loosoo dhigo duhurnimada 9/24/20.
Sebteember 24, 2020	Su'aalahada badanaa la iswaydiiyo waxaa la cusboonaysiin doonaa duhurnimada. Macluumaadka madasha RFP waxa ay noqon doontaa 4:00. Hadii aad doonayso, fadlan iska duwaan geli halkan.
Sebteember 28, 2020	Usoo gudbi su'aasha su'aalaha badanaa la is waydiiyo ugu danbayn duhurnimada, si jawaabta loosoo dhigo duhurnimada 9/29/20.
Sebteember 29, 2020	Su'aalahada badanaa la iswaydiiyo waxaa la cusboonaysiin doonaa duhurnimada. Macluumaadka madasha RFP waxa ay noqon doontaa 6:30. Hadii aad doonayso, fadlan iska duwaan geli halkan.

Oktoober 1, 2020	Usoo gudbi su'aasha su'aalaha badanaa la is waydiiyo ugu danbayn duhurnimada, si jawaabta loosoo dhigo duhurnimada 10/2/20.
Oktoober 2, 2020	Su'aalahada badanaa la iswaydiiyo waxaa la cusboonaysiin doonaa duhurnimada.
Oktoober 6, 2020	RFP waxa uu ku eeg yahay

Su'aalaha Mashruuca

Su'aalaha iyo macluumaadka ku saabsan buuxinta arjiga deeqda lagu bixiyay Bixinta Deeqda Lacagta waxaa lasoo dhigi doonaa hoos. Jawaabta barnaamijkaaga/hay'adaada arjiga waa in lagu soo gudbiyaa online ahaanhttps://youthdevrelief.schoolsoutwashington.org/. Fadlan xaqiiji in aad buuxisay shuruudaha u qalanka ee lagu sheegey RFP kahor inta aanu bilaabmin arjigu.

Marka aad bilawdo arjiga online-ka ah, ma kaydin kartin waxa aad qortay inta aad wado shaqada. Waa inaad ku dhamaystirtaa arjiga hal fadhi. Waxaa lagu talinayaa inaad marka hore si buuxda u eegto oo aad ka jawaabto su'aalaha ku jira shaxda link-ga bilawga wakhtiga lagu sheegey arjiga, oo aad ku koobiyayso jawaabaha foomka arjiga online-ka ah si aad u gudbiso.

Booqowebsaytka Deeqda Lacagta Samofalka SOWA ee ay ku qoran yihiin liiska bixiyayaasha kaalmada farsamo ee dadka ka caawin kara buuxinta arjiga deeqda ah, oo ay ku jiraan fahanka shuruudaha RFP iyo bixinta taageerada qoraalka dalabka lacagta. Kaalmada farsamo waxaa lagu heli doonaa Ingiriisi iyo dhawr luuqadood, waxaana lasiin doonaa hay'adaha gobolka oo dhan.

Arjiga online-ka ah waa in lagu gudbiyaa Ingiriisi ahaan.

Macluumaadka Barnaamijka/Hay'ada

- Waxa aan u dalbanayaa aniga oo matalaya:
  - □ Hay'ada
  - □ Barnaamijka

- Hay'adeena waxaa maal geliya hay'ado samofal:
  - □ Haa
  - □ Maya

  *Hadii ay haa tahay, waxaa lagaa dalban doonaa inaad geliso warqad saxeexan oo ka socota cida maalgelisa taas oo xaqiijinaysa xidhiidhka maalgelineed dhamaadka arjigan.

- Dooro dhamaan degmooyinka aad u shaqayso hay'adaada ama barnaamijka arjigan diirada lagu saarayo:

- Magaca Sharciga Hay'ada:

- Magaca cida hay'ada maalgelisa, hadii uu ku haboon yahay:

- Lambarka Aqoonsiga Loo Shaqeeyaha (Employer Identification Number, EIN):
  Qoraal: hadii barnaamijka/hay'ada ay jirto cid maalgelisaa, fadlan waxa aad gelisaa cida maalgelisa iyada oo EIN ah

- Lambarka Aqoonsiga Ganacsiga Gaarka ah (Unified Business Identifier, UBI)

- Cinwaanka Kowaad
  - Khadka Ciwnaanka 1
  - Khadka Ciwnaanka 2
  - Magaalada/Caasimada
  - Boosta
  - Gobolka
  - Degmada

- Sharaxa:bixinta sharaxa kooban ee hay'ada (shaqada, himilada, adeega, bartilmaameedka) waxaanad kusoo koobtaa 750 xaraf.

- Magaca goobta: Ikhtiyaarada (ikhtiyaarka doorashada isla hay'ada)
  Qoraalka: Hadii ay ku haboon tahay in lagu dalbado dhawr goobood, fadlan waxa aad ku dartaa magaca iyo cinwaanka kaliya mid kamid ah kuwan.

- Cinwaanka goobta: (ikhtiyaarka doorashada isla hay'ada)
  - Khadka Ciwnaanka 1
  - Khadka Ciwnaanka 2
  - Magaalada/Caasimada
  - Boosta
  - Gobolka
  - Degmada

- Magaca Barnaamijka: (ikhtiyaarka doorashada isla hay'ada)
  Qoraalka: Hadii aad u dalbanayso dhawr barnaamij, fadlan waxa aad ku dartaa magaca iyo sharaxa kaliya hal kamid ah barnaamijyadan halkan.

- Sharaxa: Bixi sharax kooban oo barnaamijka ah (cida iska leh, barnaamijka waxa diirada lagu saarayo) waxaanad kusoo koobtaa 750 xaraf.

- Magaca Hay'ada dalbanaysa, goobta iyo barnaamijka iyo goobaha waxaa la gelinayaa halkan, waxaana lagu darayaa hagaha barnaamijka dhalinyarta shacabka ee Elevate Washington. Hadii goobtu sir tahay, fadlan waxa aad saxdaa halkan si aad u dalbato inayna kasoo bixin hagaha.

Macluumaadka U Qalanka

Fadlaan sax dhamaan sanduuqyada ay khusayso:
□ 501 (c)(3) hay'ada samo fal ama xisaabta maalgeliayha ee 501 (c)(3)
□ Barnaamijkayga/hay'adayda adeegyada siiya hormarka dhalinyarta ee caruurta iyo dhalinyarta u dhaxayso da'doodu 5-24 wixii ka horeeyay COVID-19.

□ Intii u dhaxaysay Maarso iyo Diseember 2020, barnaamijkayga/hay'adayda iyo/ama qorshayaasha lagu bixinayo adeegyada dhalinyarta iyada oo foolka fool ah, maqal iyo muuqaal ama taageerada loo baahan yahay ee tooska ah.
□ Barnaamijkayga/hay'adayda waxa ay la kulmeen saamayn dhaqaale oo xun taas oo ka timid COVID-19.

Barnaamijkayga/hay'adayda waxa uu bixinaya adeegyada soo socda wixii ka horeeyay COVID-19:
□ barnaamijyada waxbarashada oo la balaadhiyay sida waxbarashada dugsiga kadib iyo barnaamijyada xagaaga
□ tusaalayn
□ adeegyada soo koobitaanka kuwaas oo la xidhiidha dad dhaxgalka/dareenka iyo taageerada aan waxbarashada ahayn ee dugsiga habdhismeedkiisa

Barnaamijkayga/hay'adayda waxa uu siinayay adeegyada hormarka dhalinyarta wixii ka horeeyay COVID-19 caruurta iyo dhalinyarta da'adahan:
□ 5-12
□ 13-18
□ 19-24

Macluumaadka Ku Saabsan Shacabka Mudnaanta iyo COVID-19 Saamaynteeda

Fadlan xaqiiji in jawaabahaaga aad ka bixisay su'aalaha hoose ay kaliya khuseeyaan barnaamijka hormarka dhalinyarta ama hay'ada hormarka dhalinyarta ee aad u doonayso kaalmada dhaqaale. Tusaale ahaan, hadii aad u dalbanayso barnaamijka hormarka dhalinyarta oo ay wado hay'ada balaadhan, oo adeegyo badan bixisa, jawaabaha su'aalahaas kaliya waa inay khuseeyaan barnaamijka hormarka dhalinyarta.

1. **Dhalinyarta loogu shaqeeyo shacabka mudnaanta la siiyay.** Maalinta Deeqda Lacagta Samofalka ah waxa mudnaanta lagu siin doonaa dhalinyarta aadka uga fog cadaalada waxbarashada.

    a. Fadlan eeg bulshada dhalinyarta ee mudnaanta kuwaas oo diirada saara barnaamijkaaga/hay'adaada hormarka dhalinyarta:
        - □ Dhalinyarta saboolka ah, oo lagu qiyaaso u qalanka qadada bilaashka ah - qiimaha jaban
        - □ Dhalinyarta BIPOC
        - □ Dhalinyarta soo galaytiga ah
        - □ Dhalinyarta qaxootiga iyo/ama soo galaytiga ah
        - □ Ardayda luuqada Ingiriisiga
        - □ Dhalinyarta bilaa guriga ah
        - □ Dhaliyarta la korsado
        - □ Dhalinyarta LGBTQ
        - □ Dhalinyarta ku jira nidaamka cadaalada danbiga
        - □ Dhalinyarta laxaadka la', oo ay ku jiraan kuwa jidh ahaan, korniin ahaan, iyo/ama garaad ahaan laxaad la'; ama baahiyaha gaarka ah ee daryeelka caafimaadka ah qaba
        - □ Barnaamijkayga/hay'adayda diirada ma saarto wax kamid ah dhalinyarta mudnaanta ah ee kor lagu sheegey.

b. Hadii aad u shaqayso dhalinyarta BIOPOC, fadlan waxa aad eegtaa kuwan ka ah dhalinyarta BIOPOC
dadka ku jira barnaamijkaaga:

- □ Hindida Maraykanka/Dhalad Alaska
- □ Aasiyaan/Asiyaan Maraykan
- □ Madaw/Maraykan Madaw
- □ Hispanic ama Kasoo Jeeda Latino/a/x
- □ Bariga Dhexe ama Waqooyiga Afrika
- □ Iska Dhal
- □ Dhalad Hawaii/Jasiirada Baasifiga

c. Fadlan sheeg qiyaasta boqolkiiba dhalinyarta caadiyan aad ugu shaqayso barnaamijkaaga/hay'adaada kuwaas oo ay ku jiraan mid ama wax ka badan oo dhalinyarta bulshada mudnaanta ee aad sheegtey: _____

d. Waxa aanu doonaynaa in aanu wax ka barano dhalinyarta ku jirta barnaamijka/hay'ada. Sharax sida barnaamijkaaga/hay'adaada dadkeeda dhalinyarta ahi ay u matalayaan hal ama wax ka badan oo bulshooyinka mudnaanta lasiiyay ee aad ku sheegey kor. Hadii shacabka dhalinyarta ah ee aad u shaqaysaa ay isbadaleen COVID-19 darteed, waxa aad si kooban u sheegtaa sababta. Fadlan waxa aad ku koobtaa jawaabtaa 2,600 oo xaraf. Jawaabtaada su'aashan waxa weeye 50% isugayn dhibcaha.

2. **Shaqaalaha Barnaamijyada/Hay'adaha iyo Hogaankooga** Maalgelinta Deeqda Lacagta Samofalka waxa uu siin doonaa mudnaanta barnaamijyada/hay'adaha leh shaqaalaha iyo hogaanka ay kamid yihiin bulshada dhalinyarta ee ay mudnaanta siinayaan.

a. Ka wada hadla sida shaqaalaha, hogaanka, gudida maamulka iyo dadka wakhtigooda ku deeqay ay uga mid yihiin dhalinyarta mudnaanta aad siinayso. Fadlan waxa aad ku koobtaa jawaabtaa 2,200 oo xaraf. Jawaabtaada su'aashan waxa weeye 20% isugayn dhibcaha.

3. **Saamaynta safmarka COVID-19** Maalgelinta Deeqda Lacagta Samofalka waxaa loogu talo geley inay yarayso wax kamid ah saamaynta safmarka COVID-19 ee barnaamijyada/hay'ada ka shaqeeya hormarka dhalinyarta ee Washington oo dhan.

a. Fadlan waxa aad noo sheegtaa macluumaad kooban oo ku saabsan maaliyada 2019 iyo (saadaasha) 2020:

- 2019 dakhliga barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta:
  $_____
- 2019 kharashka barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta:
  $_____
- (Saadaasha) 2020 dakhliga barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta:
  $_____

- (Saadaasha) 2020 kharashka barnaamijyada/hay'adaha hormarka dhalinyarta: $_____

b. Fadlan ka hadal barnaamijka/hay'ada hormarka dhalinyarta ee saamaynta dhaqaale uu ku yeeshay COVID-19. Muxuu ku yimid saamayn adeegyada aad bixiso? Sidee ayuu COVID-19 u sameeyay dakhligaaga? Sidee ayuu COVID-19 u sameeyay kharashkaaga? Waxa aad qortaa liiska deeqaha samofalka shacabka ama gaarka ah ee COVID-19 ee barnaamijkaagu/hay'adaadu heshey, oo ay ku jiraan deeqda lacagta Barnaamijka Ilaalinta Mushaharka. Fadlan waxa aad ku koobtaa jawaabtaa 2,200 oo xaraf. Jawaabtaada su'aashan waxa weeye 30% isugayn dhibcaha.

Shahaado:

Magaca qofka buuxinaya foomkan:

Cinwaanka iimeelka: Lambarka taleefanka:

Dhamaan deeqda lacagta dalbadaha ee la bixinayo waxaa lagu dalban doonaa iyada oo la buuxinayo oo la saxeexayo W-9. Bixinta deeqda lacagta waxa ay noqon doontaa elektoroonig ahaan waxaana ay mari doontaa Automated Clearing House (ACH). School's Out Washington waxa uu u diri doonaa foomka ogolaanshaha ACH iyo W-9 foomka ah oo uu marin doonaa DocuSign marka uu u diyaro dadka la siiyay deeqda. Soo celinta waraaqahan waxaa la dalban doonaa todoba maalmood gudahood marka uu nasoo gaadho. Fadlan sheeg cida foomka ACH iyo dalabka W-9 ay tahay in loo diro:

Magaca: Cinwaanka iimeelka:

Hadii la bixiyo deeqda, lixda sano ee ka danbeeya taariikhda deeqda lacagta la bixiyay, dalbaduhu waxa uu ogolaaday inay School's Out Washington geli karo Foomka 990 iyo duwaanada dhaqaale ee kale ee wixii macluumaad ah ee macquul ah si loo xaqiijiyo in macluumaadka dhaqaale uu ku jiro arjigan.

"Waxa aan xaqiijinayaa in la ii ogol yahay inaan gudbiyo arjigan aniga oo matalaya hay'ada dalbanaysaa."

"Waxa aan xaqiijinayaa, marka aan saxeexo arjigan in hay'ada dalbanaysa ama cidna maamushaa inaan laga joojin, la hakin ama lagu talinin in laga joojiyo, loo diidin u qalanka, ama si iskood ah inayna uga bixin ka qayb galka shaqadan ee hay'ada ama waaxda Federalku."

"Waxa aan xaqiijinayaan in macluumaadka aan ku sheegey arjigan iyo macluumaadka aan ku bixiyay waraaqaha xoojinta ah iyo foomamku inay yihiin dhab oo ay sax yihiin oo ay waafaqsan yihiin dhamaan wixii waraaqo ah. Waxa aan sidoo kale fahansanahay in wixii bayaan been sheeg ah ama in si ula kac ah looga reebo macluumaad arjigan ay keeni karto in la gudo deeqda lacagta ama talaabo kale oo sharci ah oo khiyaano ah."

Mashruucan waxa lagu taageeri jiray deeqda lacagta ah ee ay siiso Waaxda Maaliyada Maraykanku. Aragtida waraaqahani waxaa weeye aragtida qoraaga oo maaha aragtida rasmiga ah ama xeerarka Waaxda Maaliyada Maraykanka. Waxaa bixiya deeqahan Barnaamijka Kaalmada Isku Halaynta Ganacsiga Yar, Waaxda Gobolka Washington ee Ganacsiga.